# SIDEE MUATAQBALKA LOO HAGAA?

**Marko Ahvenainen, Katariina Heikkilä, Leena Jokinen, Sari Miettinen, Johanna Ollila, Nina Pietikäinen & Kati Vuorisalo**



**ISBN 978-952-249-494-8**
**University of Turku**
**Finland Futures Research Centre**

Turun yliopisto University of Turku
FINLAND FUTURES RESEARCH CENTRE
WINNOVA LÄNSIRANNIKON KOULUTUS OY
European Union European Social Fund
Leverage from the EU 2014–2020

Buuggan shaqadda ee mustaqbal ku hagiddu wuxuu ka curtey jaamacadda Turku xarunteeda baadhitaanada oo agaasimeysa UTUA – Abuuritaanka mustaqbalka cusub iyo OMASI – mashruuca raadinta mustaqbalkaaga. Mashruuca waxaa maal gelintiisa ka qeyb qaatey maareynta nolosha ee badhtamaha-Finland-, xarunta deegaanka-iyo gaadiidka, waxaana loogu talogaley koboc waara iyo shaqo 2014–2020 qorshaha- maalgelinta Finland.

Warbixinta dheeraadka ah ee ka fikiridda mustaqbalka iyo- hagitaanka waxaad ka heleysaa buuggan dulucdiisa iyo sidoo kale cinwaanka www.tulevaisuusohjaus.fi. sidoo kale boggan waxaad ka heleysaa buuggan oo gebi ahaanba ku qoran finnish, iswidhish iyo ingiriisi.

Waxaanu rajeyneynaa, in buuggani ku caawiyo kana heshid waxyaalo cusub oo kugu hagaya shaqadaada!



# SIDEE MUATAQBALKA LOO HAGAA?
## – Theses ku hagida mustaqbalka

Hagitaanka mustaqbalka udubkiisu waa in la abuuro awooddo mustaqbalka looga fikirayo qaabab badan iyo aragtiyo kala duduwan. Ma laha nooc sax ah ama khalad ah, oo ah sida mustaqbalka loola dhaqmo ama sida looga fikiro. Qaabka ugu haboon ee looga fikiraa wuxuu ku xidhan yahay arrimaha la xidhiidha iyo xaaladaha

Shaqada hagitaanka mustaqbalka waa in loo fidiyo tusmooyin iyo maadooyin loogu dhawaan karo. Qaababka loola dhaqmayo ka fikirkooda ayaa furaya fursado loogu howlgalo xaaladaha kala duduwan iyo noocyo kala duduwanba. Tusaale qofku wuxuu heli karaa arrimo, kuwaas oo uu isagu dhab ahaantii badeli karo, dhinaca kalena arrimaha ka soo horjeeda dhacdooyinka oo keliya kuwaasoo ah in nolosha lagu barto.

Mustaqbalka waxaa la isku dayayaa in loo sahamiyo si ballaadhan oo buuxda. Markaas ayaana laga hadlayaa fursadaha, waxaa la rajeynayaa xaqiiqduna ay u dhowdahay mustaqbalka. Fursadaha mustaqbalka marka laga fikirayo ujeedaddu waa in la ballaadhiyo aragtida ooinaga caawineysa dareenkawax cusub ama waxyaalaha aan horey kuu soo marin. Mustaqbalada la rajeynayo ka wada sheekeysigoodu wuxuu keenaa qiimeyniyo in laga xaajoodo. Ka fikirku wuxuu caawinayaa qeexitaankasida, waxyaalaha aynu u heysano iney muhiim yihiin iyohadafkooda iyo sababta. Sida xaqiiqda ah mustaqbalka ayaa inagu fikir gelinaya waxyaalo kala duduwan ii isbedelka keena iyo waxyaalahaa saameynta ka dhaxeysa. Waxay sidoo kale kugu hagayaan muhiimadda ka fikiraada wajihida horumarka iyo rabitaanka saameynta kugu dhalaneysa.

Mustaqbalku mar kasta waa lama filaan isbedelada waaweynina waxay u dhacaan si kadis ah. Ma jiro wax damaanad qaadaya, in aynu si uun u kantarooli karno ama ugu hagi karno mustaqbalkeena sida aynu

dooneyno inuuinoo noqdo. Hagitaanka mustaqbalka waxaynu siineynaa dadka fikir iyo qalab ay ku howlgalaan, kuwaas oo aynu u adeegsan karno in aynu awoodno in mustaqbalkeena ku jiheyno rajooyinka khuseeya sidoo kalena loogu tabaabusheysto silsiladaha dhacdooyinka ahee kala duduwan.Hagitaanku sidoo kale wuxuu dhisayaa awood uu qofku ku arki karo mustaqbalkiisa, qeybna ka ha bulshada iyo agagaarkaba.

## 1.Ka fikirka mustaqbalka oo si kala duwan loo cabirayo - aragtida xiliyeysan/ mudeysan

Mustaqbalka marka laga fikirayo iyo isku diyaarinta mustaqbalka arrimaha la xidhiidha dhammaanteenba waan leenahay. Xataa haddii uu qofku odhanayo inuu u nool yahay talaabo talaabo, si kastaba wuxuu leeyahay fikiro qaar ah oo dhacdooyin muddo dheer ku dhici kara. Hagitaanka mustaqbalka si dabacsan ayaa loola socon karaa, taariikh shakhsi ahaaneed, oo u dhexeeya mustaqbalka iyo hadda wakhtigan la joogo. Dadka qaarkood beri waxay u noqon kartaa maalin u mudeysan, xaga kuwo kalena ay uga fikirayaan naftooda iyo aduunku sida uu u socdey tobanaan sano oo xilli socod ah. Muhiimaddu hagitaanku waa in uu mustaqbalka jiritaankiisu ina soo gaadhayo iyo in aan ka heleyno wax aan jecleysano iyo sidoo kale dhacdooyin, kuwaas oo marka loo eegomustaqbalkeena muhiim u ah.

## 2. Mustaqbalka waan wada sameyneynaa kalana sameyneynaa

Mustaqbalka lama hubo si hubaal ahna looma garan karo – mararka qaarkood arrimaha xaqiiqada ahi uma dhacaan sidii aynu ka fileyney. Tan waxaa looga jeedaa hagitaanka, in ay fursaduhu kuu furmayaan kaana xidhmayaan marwalba. Su’aashu waxay tahay, sidee ayeynu u awoodnaa oo aynu u dooneynaa in aynu u hagno nolosheena. Dhammaanteenba waxaynu leenahay mustaqbal inoo gaar ah, kaas oo aynu qeyb ahaan inagu sameysano. Agagaarkeena inagu wareegsan ee aan ka howlgalno waxaa ka dhaca arrimo, kuwaas oo aynaan si toos ah saameyn ugu yeelan kareynin, laakiin waxaa jira arrimo badan oo si kastaba aynu saameyn ku yeelan karno. Mustaqbalkeena waan ka shaki qabnaa mar kasta si kastabase marxaladaha isku midka ah oo dhan waxaynu la xidhiidhinaa mustaqbalkeena.

## 3. Ka xaajoodka mustaqbalku wuxuu ku dhismaa kalsooni iyo hufnaan

Aragtiyaha mustaqbalkaagu ma sahlana inaad u sheegtid qof kale. Waana caadi, in marwalba adigu xataa aanad aqoonin” waxaad nolosha ka rabtid” mararka qaarkoodna dhammaan waxa mustaqbalkaaga khuseeya dareemistoodu xataa ma laha ereyo aad ku qeexdid. Ka xaajoodka mustaqbalka waxaa la xidhiidha dareeno badan tusaale ahaan dareenka xornimada, rajada iyo xamaasadda, laakiin sidoo kalena cabsi iyo diiqad. Xaaladaha hagitaanka waa kuwo aad xasaasi u ah sababtaasaana ku hagitaanka mustaqbalka ee is dhexgalku ay tahay in lagu dhiso kalsooni iyo in la aqbalo khibradaha iman doona. Xaaladaha hagitaanka koox ahaaneed waxaa ku jira faa’iido, haddii sidoo kale haguhu uu u sheegi karo si furan fikiradiisa, khibradihiisa iyo dareenkiisa.

## 4. Ka jawaab celinta kuwa dhigooga ah

Dadka kale waxay inagu caawin karaan in aynu u aragno mustaqbalka qaab kale oo ka duwan sida aynu u aragno ama u dareemeyno – sababtaas ayeyna dhigoodu ama kuwa u dhow ay muhiim ugu tahay in laga helo ka jawaab celin hagitaanka mustaqbalka. Dhiiri gelinta iyo ku boorinta laga helo kuwo dhigooda ah waxay marar badan uga fududahay in ay aqbalaan in ka badan haguhu ka jawaab celinta uu bixinayo. Kuwa dhigooda ahi waxay awoodaan in ay dhexdooda uga wada sheekeystaan si toos ah iyo heer hubaal ahba,

mar hadey leeyihiin khibrado ay wadaagaan. Ka fikiridda mustaqbalka tababarkiisu wuxuu caawinayaa garashada fursado kala duduwan isagana ku cusub kuwaasoo hor keenaya, inla wada hoos imanay sistem ka wada dhexeeya bulshada.

### 5. Fursadaha adduunkaaga


Mustaqbalku waa wax ka duwan waxaad soo dhaaftey iyo waxa hadda taagan, Wixii aan soo dhaafney saameyn kuma yeelan karno, laakiin mustaqbalka iyo fursadaha ka soo furfurmaya adduunku dadkoo dhan wey u furan yihiin. Dareemida fursadahaas iyo sidoo kale kuwaas abuuristooduba waxay dhacaan hadda wakhtigan la joogo. Waxaynu hadda wakhtigan la joogo uguhowlgali karnaa marba, waxa aynu dooneyno ama aynu rajeyneyno in ay dhacaan – iyadoo fiiro loo yeelanayo xaqiiqada inagu wareegsan ee inagu xadeysan. Hagitaanka mustaqbalka waxaa la isku dayayaa inla helo qaabab kala duwan oo fara badan oo lagu hirgeliyo waxa aad ku hamiyeyso iyo waxa aad rajeyneyso, laakiin sidoo kale waxaa lagaa caawinayaa in la dareemo kuwo cusub iyo arrimo kuu kala duduwan adiga ama qaabab loo howlgalo..

### 6. Mustaqbalku wuxuu ku dhismaa male awaalka

Hagitaanka waxaa lagu abuuri karaa fikiroiyo male awaal iyo rajooyinka laga filayo mustaqbalka. Xaaladahanolosha ee aad hagi kartid waxay noqon karaan kuwo aad kuugu adkaan kara, laakiin waxaa suurtogal ah in aad u hesho fursado waxyaalo aragtiyo kugu cusub ama rajooyin abuura fikiro. Male awaaladda waa la abuuri karaa lana xoojinkaraa tusaale ahaan nidaamyada ka alkuma farshaxanka, sida qoritaanka ama ku shaqeynta hiwaaydda oo kale. Iyadoo la adeegsanayo male awaalka waa suurtogal in laga dheeraado wakhtigan hadda la joogo oo si waadax ah looga fikiro mustaqbalka. Marka aynu hageyno mustaqbalka si aynu u helno male awaalo wanaagsan, waxaa iyadoo mustaqbalka laga fikirayo la noqon karaa xiiso geliye tamar siinaya.

### 7. Masuul ka noqoshada naftaada iyo agagaarkaaga

Wax qabadkeenu markasta waa mid saameyn ku leh agagaarkeena, sababtaas ayaa wacyigelinta mustaqbalkeenu u yahay mid aan la inkiri karin saameynta uu ku yeelanayo dadka kale. Mustaqbalku dadka uma aha oo kaliya wakhti ay kaga gudbaan wacyiga hadda la joogo ama adduunkii fursadaha, ee waa aqoonta mustaqbalka oo qeyb ka ah jiritaanka qofka shaqsiyadiisa iyo dabeecadiisa. Fahanka iyo masuul ka noqoshada waxa uu sameeyo iyo waxyaalaha ay keeni karaan waa qeyb ka mid ah aqoonta mustaqbalkiisa, taas oo ujeedadeedu ay ka ballaadhan gebi ahaanba sida dhibaatooyinka imaya xallintooda ama doorashooyin khaas ah sameyntooda.Is hagitaanka iyo anigoo firfircoon khibradda ah waxay muhiim u tahay hadafka hagitaanka mustaqbalka. Kuwaas oo aynu ku xoojin karno in aynu ka fikirno waxyaalaha aynu sameyneyno iyo waxa ay ku kasban karno shaqsi ahaanteena iyo dadka kaleba.





# Hagitaanka mustaqbalka iyo dabinadda

### 1. Bilowga hore si wanaagsan xoogga looma saarayo

Mararka qaarkood la hagayaashu waxay ku yimaadaan xaaladdo hagitaan oo dabci guracan sababtaas ayeyna u wanaagsan tahay in wajahaada horeba fiiro gaar ah loo yeesho. La haguhu waa in uu culeyska saaro, in hagaha ay ka soo wada jeedaan ”isku dhinac” - ee aanu ku lidi aheyn. Bilowga horeba waa in la sameeyo shaqo wanaagsan, si qofka la hagayaa uu xaaladan dusheeda kore uga helo fikir wanaagsan oo bosotif ah.

### 2. Male awaalka xooggan ama jiritaanka- horaantiisa hageysa

Haguhu waa inuu iska ilaaliyo darajo siin ku hagida: ” haddii uu diciif ku yahay arrimaha qaar, ma ahan in uu weligiiba ku ahaanayo diciif”. Qof kastaaba horumar wuu sameyn karaa waxna wuu baran karaa, loogama jeedo inuusan qofkaasi ku wanaagsaneyn meelo kale. Dhammaanteenba isku meel wax inoogama bilaabna. Tanina waxay saameyn ku yeelaneysaa doorashooyinka aanan la dafiri karin, kuwaas oo inoo furma oo aynu sameyno, kaakiin aansi kastaba ha ahaatee horey u qeexeynin natiijada, Shaqada haguhu waa inuu caawiyo la hagaha si uu dareemo waxa uu ku wanaagsan yahay. Haguhu sidoo kale wuu badeli karaaqofka la hagayaa waxa uuka sii aaminsan yahay naftiisa iyo fursadihiisaba,

### 3. Adkaanshaha kulanka la hagaha

Ku hagitaanka mustaqbalka waa inuu haguhu iska ilaaliyo inuu naftiisa dhigo jago ka koreysa la hagaha. Marka uu haguhu kala sheekeysanayo la hagaha mustaqbalkiisa waa inuu isla heer iska dhigaa uuna ahaado taageerihiisa, lana helo in la abuuro jawi hagitaan oo kaalmeysan. Jaranjarooyin la dajiyey iyo tusaale siin ”kor loo qaadayo” ayaa lagu heli karaa in la haguhu dareemo, in aynan fikiradiisa iyo khibradihiisu qiime laheyn.

### 4. Ballan qaadka hagitaanka iyo aragtida xaaladda ardeyda

Waxaa muhiim ah, inuu haguhu ballan qaado inuu hagayo kana kaalmeynayo la hagaha xaaladaha kala duduwan iyo doorashooyinkiisa. Haguhu waa inuu ku dhiirigeliyaa oo uu ka kaalemeeyaa tusaale ahaan waxbarashada sii wadideeda oo kale. Lahaguhu waa inuu arki karo xaaladiisa ku aadan dooroshooyinkiisa kuwa ugu wanaagsan iyo sidoo kale iyo guud ahaanba kuwa uguwaaweyn, kuwaas oo qeyb ka ah hal

doorosho uun. Ku hagiddu waa dhammaan shaqooyinka – ee ma ahan hagaha- waxbarashada uun.Macalimiinta waxaa wanaagsan iney fahmaan, in ku hagidda xataa uu masuul ka saaran yahay.

### 5. Si sinaan ah in loola dhaqmaa waa uun iska hadal

Si sinaan ah in loola wada dhaqmaa ma ahan mid iska bayaan ah, ee waa mid uga baahan hagaha inuu ku dadaalo uuna jiritaankeeda sii dareemi karo uuna qiimeyn karo. Haguhu waa inuu dhammaan dadkoo dhan ula dhaqmo si siman, xataa kuwa uunan jinkoodu ”kemiyadoodu” iska helin. Hagitaan siman waxaa looga jeedaa in la hanto, isku furfurnaansho iyo garashadakala duwanaanshaha oo la dareemo xaaladaha hagitaanka. Dhammantoodba waa in loo fidiyaa hagitaan waana in qof kasta looga kaalmeeyo xaaladaha oo dhan qaababka loo dalbadey.

### 6. Ku xayirmay xaaladda hadda la taagan yahay xallinta dhibaatooyinkeeda

Marar badan xaaladaha hadda la taagan yahay hagistooda waxaa loo dareemi karaa si diiqadeysan. Hagitaanka mustaqbalka waxaa la isku dayayaa in marwalba loo hago meel fog oo talaabo walba la sii qaado talaabada ku sii xigta ah. Marka hagitaanku sii wajaho mustaqbalka sii fog, xaaladda hadda la joogaana waxay u sii muuqan kartaa aragti cusub ama noqon kartaa mid si fudud loogu sii dhawaado.

### 1. Fikirka cidhiidhiga ah ee jinsiga (lab iyo dhedig)

Ku hag dadnimada, oo ha ku hagin jinsigiisa. Ku hag si ku saleysna, waxa uu la haguhu xiiseynayo iyo waxa uu ku hamiyayo. Ha ka siinin talooyin xalkiisa adigoo ku saleynaya, waxa la hagaha jinsigiisu yahay ama si loo soo muujinayo jinsigiisa. Biraha ka shaqeyntoodu wey ku haboon tahay cid kasta, sidoo kalena xanaaneynta carruurta shaqadooda. Muuji oo su’aal sidoo kale la hagaha fikradihiisa guracan ee ah in ay shaqooyinka ama xirfaduhu ku kala haboon yihiin lab iyo dhedigga.

### 8. Muhiimaddadhaqanka iyo taariikhda lama dareemayo

Hagitaanka marka lagu jiro aqoonta dhaqanka waxaa looga jeedaa, in uu haguhu fiiro u yeesho saameynta dhaqanku uu ku yeelanayo hage ahaan iyo la hageba. Dhaqanka, sawirka aduunku ka haysto iyo qiimihiisu waxay saameyn ku yeelanayaan caadooyinka aynu ku hawlgalno iyo dhaqamada kala duwan sida ay arrimaha u kala qiimeeyaan. Haguhu waa inuu dareemo tan markuu sameynayo shaqadiisa hagitaanka ah kuna howlgalo isagoo xushmeynaya kala duwanaanshahaas. Hagaha waxaa sidoo kale wanaagsan inuu ka fikiro, miyuu ku xoojinayaa shaqadiisa dhaqmadan guracan mise wuxuu suurogelinayaa jabintooda.



# Tusaaleyn hawlaha kaalmeyntooda ah

**Guud ahaan:**

- Shaqooyinkani waxay isku bedbedelaan oo ay qaadanayaan 15–45 daqiiqadood waxayna ku xidhan tahay ka qeyb qaatayaasha cadadkooda iyo firfircoonida ka qeybgalkooda.
- Qeybo ka mid ah shaqooyinkani waxay ku haboon yihiin koox ku hagi iyo sidoo kale shaqsi ku hagid.
- Waxaad u adeegsna kartaa shaqadan marba sida ay tahay kooxda baahideedu: waxaad tijaabin kartaa hal shaqo oo kaliya ama waxaad sameynkartaa dhowr shaqo halkii mar kulanba. Waxaad sidoo kale soo koobi kartaa shaqada adigoo kuwa aad xiiseyneyso isku soo xidhaya oo aad dhammaantoodba maalin qudha sameyn kartaa.
- Dhammaan shaqooyinkan waxaa laga heli karaa cinwaankan: www.tulevaisuusohjaus.fi. Waad ka soo daabacn kartaa halkaas shaqada cadadka aad dooneysid ama waxaad qeyb ahaan ku muujin kartaa gidaarka adigoo adeegsanaya fiidiyow soo saaraha.
- Mar kasta oo la kulmo ugu dambeynta waa in laga yeeshowada sheekeysi: Maxaa fikir kaaga dhashey kulankan? Maxaa ku xiiso geliyey ama aadan ka helin? Ma jirey wax kugu adkaadey ama aadan jecleysanin, haddii uu jirey muxuu ahaa?
- Qeybo shaqada ka mid ahi waxaa laga yaabaa iney dhaliyaan ka sheekeysi midheer shakhsi ahaaneed ah. Taas u yeelo fiiro gaarah dhinaca kooxda dhaqdhaqaaqeeda iyo awoodooda. Isku dey haddii loo baahdo in aad sheekada ka hogaamiso heer dhexdhexaad ah hubina in ay aaminaada iyo kalsooniddu badbaado.


**Tilmaamahan soo socdaa waxay horey umarinayaan howlaha kooxda iyo shaqada sameynteeda. Tilmaamahan waxaa wanaagsan in lala dul maro kooxda bilaabeysa:**

- Marka hore waa in la is barto. Xataa in qof walba magaciisa ku qorto xaashi xabag leh ama koolo ku dhejisto oo uu ku xidho meel muuqata. Haddii ay kooxda ku soo biiraan dad cusubi mar kale in la is bartaa waa mid meesha ku jirta.
- Tababarada waxaa loo sameynayaa wadajir ama keli. Qof kastaa wuuxu uga qeybgalayaa howlaha kooxda hadba intii ay awoodiisu gaadhsiisan tahay.
- Hadalku ma ahan qaabka keliya ee looga qeyhbgalayo: wax waad qori kartaa, sawiri kartaa ama waad dhageysan kartaa oo keliya.
- Jawaabo sax ama khalad ahi ma jiraan. Kooxdu wey wada sheekeysanayaan, waa la is dhageysanayaa waxaana la isku dayayaa in arrimaha laga eego dhinacyo kale oo cusub.
- Ha maleyn: marar badan waxaan moodnaa in aan qofka kale aqoonta ka badsano jinsigiisa darteed, inagoo ku saleyneyna muuqaalkiisa ama sooyaalkiisa. Sii qof kasta fursad uu kuugu sheego khibradiisa iyo shaqsi ahaantiisaba.
- Ha u hadlin dadka kale ama kuwa kale khibradooda, ka hadal uun khibradaada.
- Sidoo kalena hagayaashu xataa wey ka qeyb galayaan weyna la qeybsanayaan khibradooda kuwa kale.


**Kaadhasha shaqada ee buugga mustaqbal ku hagidda**

- Kaadhka mustaqbalka
- Xairfaddii uu ku hamiyayey caruurnimadii
- Aqoonta mustaqbalka
- Xirfadda bingo
- Matalaada mustaqbalka iyo ka dareen celinta
- U codeynta mustaqbalka
- Mustaqbal shaqsi ahaaneed oo waafi ah
- Doorashada iyo qiimahooda
- Mustaqbalka xirfad ahaaneed

+ Wireen/Kaadhkaaga aad leedahay ama bogga internetka: Fursadaha la xidhiidha nolosha shaqada.



# Kaadhka mustaqbalka



**Wuxuu qaadanayaa:**

15 daqiiqadood

Ku haboon in shaqsi ahaan- ama koox ahaan looga wada shaqeeyo (wax sawir ah/  ku sawiro ikoni ama wax caan ah oo ku habboon shaqada?)

**Qalabka:**

- Boos khaadho
- Calaamadda boostada
- Qalin

**Hadafka:**

Shaqada waxaad isku direysaa kaadhkii boosta ee mustaqbalka. Kaadhka ujeedadiisu waa in uu ku xasuusto oo uu qoro arrimihii falanqeyntii hore iyo fikirada. Isla markaana la wajaho fikirada mustaqbalkaaga.

**Ku hagitaanka:**

Qof kasta oo ka qeyb qaadanayaa wuxuu ka doornayaa booskaadhada kan uu isagu ugu jecel yahay. Ka qeybqaatayaasha waxaa lagu hagayaa in ay iyagu isku qoraan booskaadhka mustaqbalkooda. Kaadhka waxaad ku qori kartaa tusaale ahaan:

- Farriimo ku dhiirigelinaya adiga
- Ballamo lataaban karo arrimaha qaarkood sameyntooda iyo xaaladaadda hore u sii wadideeda
- Arrimaha, kuwa aad dooneysid inaad hanato mustaqbalkaaga
- Hadafka aad ka leedahay mustaqbalkaaga

Ka qeyb qaatayaashu waxay kaadhkooda ku darayaan cinwaankooda iyo shaabadda boostada. Kaadhasha waa la ururinayaa baqshad baa lagu xidhayaa oo lagu xafidayaa. Hagaha ayaa saddex bilood ka dib markii la qorey kaadhasha boostada ugu diraya ka qeyb qaatayaashii ka qeyb qaatey qoritaankooda.

# Xirfaddii uu ku hamiyayey carruurnimadii



**Waxay qaadaneysaa**:

15–30 daqiiqadood

Waxay ku haboon tahay wada shaqeyn koox ahaaneedopii (wax sawir ah/ ku sawiro ikoni ama wax caan ah oo ku habboon shaqada?)

**Qalabka:**

Haddii aad u baahato xaashi iyo qalin.

**Hadafka:**

Shaqadan waxay soo muujineysaa, in ay dadka da'ahoodakala duduwani ay kala leeyihiin hamiyo iyo riyooyin kala duduwan sidoo kalena isbedbedela intey nool yihiin. Maxaad ku hamiyeysey carruurnimadaadii, maxaad hada kuhamiyeysaa iyo maxaad mustaqbalka ku hamiyeysaa? Shaqadani waxay si wanaagsan ugu haboon tahay sidoo kale barashada iyo wada sheekeysiga guud ahaaneed ee xirfadaha kala duduwan.

**Ku hagidda:**

Qof kasta oo ka qeyb qaataa wuxuu markiisa sheegayaa xirfadii uu carruurnimadiisii ku hamiyayey. Waxay noqon kartaa xirfad aanan xataa jirin ama aanan xaqiiqdii la hanan karin. Muhiimaduse waa in lagu hamiyey uun. Haddii ay rabaan ka qeyb qaatayaashu sidoo kale wey sawiri karaan ama ay qori karaan xirfadaas ay ku hamiyayeen.

Wada shekeysiga waxaa hogaan u noqon kara su'aalahan soo socda:

- Waayo aad ugu hamiyeysey xirfadan?
- Weli ma ku hamiyeysaa xirfadan aad carruurnimadii ku hamiyeysey? Waayo aad ugu hamiyeysaa, waayo aanan uguhamiyeynin?
- Waa maxay xirfada aad ku hamiyeysid mustaqbalkaaga?
- Maxaad hadda imikadan aad ku hamiyeysaa?

Shaqadan marka la furfurayo waxaan ka wada sheekeysan doonaa sidoo kale muhiimada uu hamigaagu u leeyahay in aad hamigaaga hirgelisid waxaa jiri kara noocyo fursado ah oo fara badan.

# Aqoonta mustaqbalkaaga

**Waxay qaadaneysaa**:

30–45 daqiiqadood

Waxay ku haboon tahay wada shaqeyn koox ahaaneed (wax sawir ah/  ku sawiro ikoni ama wax caan ah oo ku habboon shaqada?)

**Qalabka:**

- Sawir koolo leh (Tarra)- ama xaanshiyaha xusuus qorka ah
- Qalimaan

**Hadafka:**

Hadafka laga leeyahay waa in la helo in ay ka qeyb galayaashu ka fikiraan, aqoon noocee ah iyo xirfad noocee ah ayuu qofku leeyahayba. Waxaa shaqooyinkan lagaga fikirayaa sidoo kale aqoon noocee ah iyo xirfado caynkee ah iyaa mustaqbalka loo baahan yahay in la sii kordhisto. Shaqadani waxay muujineysaa in dhammaanteenba aynu leenahay xirfado kala duduwan iyo aqoontooda iyo in aqoontaada aad u kordhin kartid qaabab farabadan oo kala duduwan.

**Ku hagidda:**

Ka qeyb galayaasha waxaa loo qeybinayaa qalimaan sawir xabageysan- ama xaashi xusuus qorid ah waxaana lagu tusaaleynayaa in ay ka fikiraan xirfado iyo shaqooyin kala duduwan (sidoo kale awoodda waxay u leeyihiin), maxaa shaqo nololeedka looga baahan yahay imika ama mustaqbalkaba. Markey kafikirayaan ka qeyb qaatayaashu waxay ka faa'iideysan karaan taariikhdoodii hore waxayna ka fikiri karaan tusaale ahaan maxaa xirfad ama aqoon ah oo horey u yaqaaney tusaale ahaan dhinaca shaqada ama wuxuu ku maararoobo ee uu caadeystey.

Ka qeyb galayaashu waxay warqad yar ku qorayaan oo ay alifayaan aqoontooda, xirfadahooda iyo waxay awoodaan (1 arrin/xaashidiiba). Xaanshiyaha diyaarka ah waxaa loo ururinayaa si wadar ah waxaana lagu ballaadhinayaa miiska ama darbigaa lagu dejinayaa. Hagaha ayaa akhriyaya aqoonta la qorey isagoo ku dhawaaqaya. Intaas ka dib ka qeyb galayaashu aqoontaas waxay ka dooranayaan laba warqad aqooneed, taas oo ah kuwo ay horey u yaqaaneen iyo sidoo mid kale taas oo ah mid ay rabaan ama ay u baahan yihiin. Haddii loo baahdo waxaa la dooran karaa sidoo kale kuwo fara badan

Shaqadan marka la furfurayo qof walba toogadiisa ayuu sheegayaa muxuu doortey iyo muxuu u doortey iney aqoontiisu ka muuqato wuxuu hadda sameynayo ama noloshiisa. Intaa waxaa dheer inuu ka qeyb qaatuhu u sheego dadka kale aqoonta ka maqan ee uu doortey iyo sababta uu u doortey.

# Xirfadda bingo

**Waxay qaadaneysaa:**

20–45 daqiiqadood

Ku haboon in shaqsi ahaan- ama koox ahaan looga wada shaqeeyo
(wax sawir ah/ ku sawiro ikoni ama wax caan ah oo ku habboon shaqada?)

**Qalabka:**

- Foomka cirfaddabingo (1 foom/ka qeyb qaatihiiba). Waxaa lagala soo bixi karaa cinwaanka: www.tulevaisuusohjaus.fi
- Qalimaan

**Hadafka:**

Shaqadan hadafka laga leeyahay waa in la helo ka qeyb qaatayaal garan kara aqoontooda iyo waxay ku wanaagsan yihiin xaga kalena dareemi kara xirfad noocee ah ayey u baahan yihiin si ay horumar u sameeyaan. Xirfadda bingo waxay soo bandhigeysaa xirfaddo guud ahaaneed oo kala duduwan, kuwaas oo looga baahan yahay shaqooyin badan oo kala duduwan iyo xirfaddo waxbarasho kuwaas oo ay suurtogal tahay in aad ka dalban kartid xataa meelo kale sida machadyada waxbarashada oo kale.

**Tusaaleyn:**

Hagaha ayaa soo daabacaya ama soo bixinaya foomamka xirfadda bingo oo u qeybinaya ka qeyb qaatayaasha foomamkaas iyo qalimaanba. Qof walba foomka wuxuu ka dooranayaa 3–5 aqoomood ama xirfadood, kuwaas oo uu leeyahayba, iyo hal xirfad, taas oo uu doonayao inuu yeesho ama uu dareemayo inuu u baahan yahay.

Shaqadan marka la furfurayo qof walba toogadiisa wuxuu sheegayaa wuxuu ka doortey foomka iyo sidoo kale sidee ayuu u hantey ama u hanan doonaa xirfadan iyada ah. Haddii uu ka qeyb qaatuhu u arko in ay xirfad muhiim ahi ay ka maqan tahay foomka waa lagu dari karaa. Ka wada sheekeysiga waxaan kaga xaajooneynaa aqoono kala duduwan muhiimadooda wakhtigan xaadirka ah iyo mustaqbalka dambe ee shaqada.

**Isku talaabta bonuska:**

Shaqadan waxaan kaga faa'iideysan karnaa sidoo kale warbixinta shaqooyinka (tusaale ahaan www.mol.fi)

Sharaxaadda shaqadda iyo ka wada sheekeysiga xirfadaha kala duduwan ee loo baahan yahay aqoontooda iyo xirfadoodda.

Foomka waxaa sidoo kale loo adeegsan karaa qaab- bingo ahaaneed: Hagaha ayaa u akhrinaya xirfadaha iyo waxay yihiin si kadis ahaan ah ka qeyb qaatayaashuna waxay ku calaamadeynayaan foomkooda iyagoo ku dhawaaqaya xirfadda hadii ay iyagu leeyihiin xirfadaas. Kan ugu horeeya ee u hela si is daba joog ah afar xirfadood ama aqoonood wuxuu ku dhawaaqayaa ”**bingo**”!

| | | | |
|---|---|---|---|
| Curiye | Nidaamsan | Rabitaan waxbarasho | Tan u fikir adigu mid! |
| Wax qiimeyn kara | Dad dhexgal | Akhriya qoraalo dhaadheer | Hogaamin |
| kama hadhe/ ka niib keenid | Daacadnimo | Aan isla weyneyn | La tashade/Talo weydiiye |
| Naftiisa ka adag | Bulshaawi | Hogaan u ah naftiisa | Qalbi ciyaar |
| Faro heybad leh | Yaqaana xirfadda kombiyuutarka | Indho garan kara midabada isku habboon | Fashinka/labiska yaqaana |
| Dabacsanaan | Awoodda inuu wax sugo | Dhakhso | Dhageysta |
| Wixii jira aqoon kara | Taxadiran | Dhaqdhaqaaqa/ Jimicsiyahan | Koox la shaqeyn |
| Dhadhan taxadiran | Dhiiran | Xusuus wanaagsan | Qoraalka |
| Cadaali | Sawirka | Jecel inuu wax walba ogaado | Jadwalka ku dhaqma |
| Tan u fikir adigu mid! | Awoodda inuu garto waxa soo socda | Naxariis leh | Ad adag |

# Matalaada mustaqbalka iyo ka dareen celinta

**Waxay qaadaneysaa:** 30–45 daqiiqadood.
Ku haboon in shaqsi ahaan- ama koox ahaan looga wada shaqeeyo
(wax sawir ah/  ku sawiro ikoni ama wax caan ah oo ku habboon shaqada?)

**Qalabka:** Kombiyuutar ama tablet iyo internet. Cinwaanka ka matalaaddda: www.getalife.fi > simulaatio

**Hadafka:** Matalaada waxaan ka darseynaa waxbarashada- iyo shaqooyinka muddo 20 ah oo soo socda waxaanan tijaabineynaa waxbarashooyin kala duduwan, shaqo- iyo doorashooyinka nolosha ee la sameynayo. Waxaa matalaada lagu meeleeyey boqolaal dhacdooyin oo kala duduwan, kuwaasoo u keenaya xirfad kasta oo matalaadaba ka duwanaansho.

**Tusaaleyn:** Matalaadda mustaqbalka ee- Get a Life waa in loogu isticmaalo iskaa shaqada iman doonta, waxaad adigu fileysid iyo qiimaha ka fikirida go'aan qaadashadooda. Isticmaaluhu wuxuu heleyaa dooroshooyin ay ku sameeyaan matalaadan iyo wixii ka soo baxa isku soo dubaridkooda, kuwaas oo lagaga faa'iideysan karo sidoo kale ka wada sheekeysiga hagitaanka. Matalaadani waxay si khaas ah ugu haboon tahay heerka labaad ee waxbarashada iyoardeyda dhigata jaamacadda ku hagitaankooda isku diyaarintooda shaqo. Ka qeybqaatayaashu waxay u sameyn karaan matalaaddan keli ahaan ama koox ahaan. Gabagabada matalaaddu waxay leedahay foom ka dareen celin ah, kaas oo adeegsaduhu uu isticmaalayo. Marka la dhameeyo matalaada ka dib waxaa wanaagsan in la isla dul maro furfuritaanka ka wada sheekeysiga, kaas oo looga faa'iideysan karo su'aalahan iyo fikiradan soo socda:

**1. Khibradaha matalaadda**

- Fikirkaaga ahaan dhacdooyinkani miyey kula yihiin suurtogal?
- Fikirkaaga ahaan dhacdooyinkani miyey ku meeleysan yihiin mustaqbalkaaga?
- Ma ku hor yimaadeen marxaladdo, kuwaasoo aadan maleyn karin in ay kuugu dhacayaan noloshaada si dhanb?
- Matalaadani ma kuu furfurtey fursado aanad horey uga fikirin?
- Ma ka fakartey matalaadan intii aad ku jirtey wax ku saleysan doorashooyinkaaga?
- Matalaadani ma kugu abuurtey in aad kafikirtid qiimahaaga

**2. Mustaqbalka shaqo nololeedka (Aragtida ka qeyb waatayaasha iyo fikirkooda mustaqbalka)**

- Ma waxaad rajeyneysaa mustaqbalkaaga shaqo xasiloon miseshaqooyin farobadan oo kala duduwan iyo wajiyo cusub?
- Qaabab shaqooyin noocee ah ayay hadafkaaga iyofursadahaagu yihiin (tusaale ahaan shaqaale ama iskaa isku shaqaaleysiinta/ meherad ama shirkad le ama kuwaas isku xidhkooda, wadajir ahaan hal mar wada shaqeyn ama marar badan isla hal mar, shaqo gelin ahaaneed, xilli ahaan ama shaqo maalin buuxda ah iwm.)
- Waa maxay waxyaalaha kugu dhiirigeliya shaqadu? (tusaale ahaan sumcadda, lacagta, isa soo saaridda ama u halgamidda, dadka kale la shaqeyntooda, dadka kale caawintooda, jagada/ booska)
- Shaqo noocee ah ayaad iska aragtaa mustaqbalkaaga?
- Waa maxay muhiimadda shaqadu ay mustaqbalkaaga u leedahay? yaa xaq u leh, waajib ay ku tahay ama fursad u haysta inuu shaqeeyo (robotiga, qalabka la sameeyey ee caqliyeysan, dadka)?

# U codeynta mustaqbalka



**Waxay qaadaneysaa:**

20–40 daqiiqadood

Ku haboon tahay in koox ahaan looga wada shaqeeyo (wax sawir ah/ku sawiro ikoni ama wax caan ah oo ku habboon shaqada?)

**Qalabka:**

Casaan iyo cagaar xaashiyogobol ah

**Hadafka:**

Ujeedadda u codeynta waxaa looga jeedaa in la kiciyo ka fikirka mustaqbalkaaga iyo kan guud ahaaneedba. Ma jiraan jawaabo sax ama khalad ahi, waxa keliya oo ay ku saleysan yihiin dareenada iyo garashooyinka. Fikir ahaan qiimeynta waxbarashada waxaa lagu hagayaa mustaqbalka iyo fursadihiisa oo loo wajahayo qaab bosotif ah.

**Hagitaanka:**

Dhammaan ka qeybqaatayaasha waxaa loo qeybinayaa xaanshiyo yaryar oo casaan iyo cagaar ah oo ay ku codeeyaan. Su’aalaha codeynta waa la isla sii dul mari karaa qeyb ahaan ama su’aalaha dhammaantoodba sida loo kala hor marinayo adaa go’aansan kara. Wada sheekeysiga waxaan yeelan karnaa su’aal kasta horaanteeda ama dabadeeda. Su’aasha 14 waxaad dooran kartaa qeyb doorashada ka mid ah oo aad adigu alifan kartid inta dheeriga ah. Wada sheekeysigu waa muhiim waana qeyb ka mid ah tababarka waxaana ku soo iftiimaya fursado kala duduwan iyo ra’ayiyo, kuwaas oo dhammaantoodba qiimahoodu isku mid yihiin.

Hagaha ayaa akhriyaya doodahan kala duduwan ee la xidhiidha mustaqbalka ka qeygalayaashuna waxay u kala codeyn doonaan, sidey u arkaan arrintaas hadda.

cadka xaashida yar ee casaanka ahi = lama qabo fikirkaas

cadka xaashida yar ee cagaarka ahi = waan la qabaafikirkaas

isku mar labada xaanshiyoodba = laga yaabe/ ma aqaan waxaan idhaahdo

**Isku talaabta bonuska:**

Waxaad u isticmaali kartaa qeyb shaqadan ”Doodahan la xidhiidha mustaqbalka shaqo nololeedka”-shaqada ka fikirkeeda oo la xidhiidha jadwadka. Doodaha marka hore waan u codeyn karnaa ka dibna ka wada sheekeysan karnaa. Doodahan ujeedadoodu waa in mustaqbalka ku wajahan yihiin iyo fikirada caqabadaha. Doodahan waxaa sidoo kale laga soo saari karaa qaar kale oo dheeraad ah.

**Su'aalaha codeynta: (kaadhka dhiniciisa kale?)**

1. Waxaan baranayaa shaqo, taas oo aan mustaqbalka doonayao inaan ku shaqeysto.
2. Waxaan garanayaa waxaan ku wanaagsanahay iyo aqoonteydaba.
3. Marar badan waan ka fikiraa mustaqbalkeyga.
4. Weli ma lihi wax qorshe ah oo mustaqbalkeyga ku wajahan.
5. Mustaqbalkeygu aad buu uga duwan yahay sidan hadda aan ku jiro.
6. Shaqo wakhti dheer ah isla shaqo bixiye uun ah waa arrin qiimo leh.
7. Waxaa muhiim ii ah inaan helo oo aan sameeyo shaqo aan jecleysanayo sameynteeda, halkaan ka qaadan lahaa mishahar wanaagsan.
8. Mustaqbalkeyga weli waxaan ka heystaa fursado dhowr ah, oo aanan weli sameynin kala doorashadooda.
9. Si cad ayaan u aqaanaa, waxa aan ka doonayo mustaqbalkeyga.
10. Shaqaalaha mustaqbalku waa inuu ahaado mid ka dabacsan sidii hore.
11. Waxaa aad muhiim iigu ah inaan helo shaqo- ama goob waxbarasho, laakiin shaqadu noocey tahay muuhiimad weyn iima laha.
12. Ma garanayo weli waxaan mustaqbalka noqon doono, laakiin waxaan aaminsanaha in ay noloshu ay wax i hor keeni doonto..
13. Mustaqbalka anigu waxaa dhici karta inaan yeesho shaqooyin kala duduwan iyo- howlo.
14. Shaqo nololeedka mustaqbalka waxaa lagaa doonayaa qofka, a) xirfad luqadeed oo wanaagsan, b) iskaa u shaqeysasho, c) inaad iibisid aqoontaada, d)yaqaano wada shaqeynta, e) dhaqan aqoonimo, f) iskibrin/ isla weyni, g) cod karnimo, h) ka adeejinta fikiradda, i) yaqaana qiimihiisa iyo j) Mowqif lahaansho
15. Mustaqbalkeyga niyad wanaagsan baan ku wajahayaa.
16. Caafimaadka wanaagsani wuxuu shuruud u yahay mustaqbal wanaagsan.
17. Waxaan mustaqbalkeyga u qorsheeyaa marba, meeleha laga helayo fursado wanaagsan oo aad shaqo ku heleysid.
18. Anigaa sameysta iskey go'aamadda khuseeya mustaqbalkeyga.

# Doodaha shaqsi ahaaneed ee mustaqbalka

**Waxay qaadaneysaa:**

30–45 daqiiqadood

Ku haboon tahay in koox ahaan looga wada shaqeeyo (wax sawir ah/ ku sawiro ikoni ama wax caan ah oo ku habboon shaqada?)

**Qalabak:**

- Doodaha mustaqbalka oo la soo daabacay (1foom/ka qeyb qaatihiiba)
- Qalimaan
- Sawiro xabageysan oo midabo leh (tusaale. sawirada xbagta leh ee carruurta ee qosqosolka ah)

**Hadafka:**

Howshan ujeedadeedu waa in la kiciyo ka qeybgalayaasha fikirkooda iyo mustaqbalkooda guudba.Ka wada sheekeysigu waa u muhiim qeyb tababarka ah waxayna iftiimineysaa fursadaha kala duduwan iyo aragtiyada - kuwaas oo dhammaantoodbana qiimo leh. Fikir ahaan qiimeynta waxbarashada waxaa lagu hagayaa mustaqbalka iyo fursadihiisa oo loo wajahayo qaab bosotif ah.

**Hagitaanka:**

Hagaha ayaa u qeybinaya ka qeybgalayaasha doodaha mustaqbalka sidoo kale qalimaan iyo xaashiyaha xabageysan. Hagaha ayaa akhriyaya doodaha waxa ku qoran marka hore, markaas ka dibna ka qeybgalayaashu waxay ku calaamadeysanayaan fikirka ay ka qabaan qoraalkaas mustaqbalka ma ku fikir baa hadda wakhtigan xaadirka ah. Jawaabta looma baahna in ay noqoto ”haa” ama ”may” ee waxaa lagu meeleyn karaa goob kasta.

Marka doodahaas oo dhan jawaabahooda la muhiimka ah la helo, waan ka wada sheekeysaneynaa. Ka wada sheekeysiga waxaa lagu habeyn karaa su’aalahan soo socda:

- Waa maxay dhammaan arrimaha saameynta ku leh dooroshooyinku? Mid walbana muxuu naf ahaantiisa saameeyaa?
- Kuwee ayey fikiradoodu saameyn ku yeeshaan dooroshooyinka?
- Warbixin iyo dareen ceynkee ah ayaa sameynta doorashooyinka ku tiirsan?
- Waa maxay sida aan ula dhaqmayo mustaqbalkeyga? Ma waxaan ahay qof furfuran oo aaminsan mise mid ka niyad jabsan?

Ku astaamee xariiqan sida aad u aragto doodahan mustaqbalkaaga kuwan soo socda:

1. **Waxaan leeyahay hami ku wajahan mustaqbalkeyga.**

Haa | Maya

2. **Mustaqbalkeyga waxaan u arkaa si iftiin ah.**

Haa | Maya

3. **Waxaa iiga muhiimsan in aan helo mushahar wanaagsan, in aan mustaqbalka ka shaqeeyo shaqo aan ku istareexayo.**

Haa | Maya

4. **Waxaan ka leeyahay fikir xaqiiqada la xidhiidha awoodeyda, xirfadeyda iyo fursadahaygaba (ma liido- mana buunbuuniyo awoodeyda).**

Haa | Maya

5. **Waxaan aaminsanahay in aan ka dabaalan lkaro fursadaha xataa haddii ay igu guracmaan/ adkaadaan.**

Haa | Maya

6. **Qoyskeygu saameyn buu ku leeyahay doorashooyinka mustaqbalkeyga.**

Haa | Maya

7. **Waxaandiyaar u ahay in aan wajahao caqabado cusub.**

Haa | Maya

8. **Waxaan aaminsanahay in sanad ka dib uu qorshaha mustaqbalkeygu ii kala cadaanayo.**

| Haa | | Maya |
|---|---|---|

9. **Waxaan diyaar u ahay inaan u guuro shaqo ama iskuul dartiis haddii aan ka helo meel kale oo Finland ah ama dalka dibadiisaba.**

| Haa | | Maya |
|---|---|---|

10. **Saameyn waan ku yeelan karaa anigu, iskuul noocee ah ama shaqo noocee ah ayaan rajeynayaa.**

| Haa | | Maya |
|---|---|---|

11. **Mustaqbalkeyga waxaan ku qorsheystaa marba meelahee ayaa fidiya fursado shaqooyin oo wanaagsan.**

| Haa | | Maya |
|---|---|---|

12. **Waan u furfuranahay arrimaha cusub.**

| Haa | | Maya |
|---|---|---|

13. **Waxaan aaminsanahay, in aan mustaqbalka u heli karo xirfad ama shaqo nafteyda, taas oo aanan weli garaneynin jiritaankeeda.**

| Haa | | Maya |
|---|---|---|

# Dooroshooyinka iyo qiimaha



**Waxay qaadaneysaa:**

30–45 daqiiqadood

Ku haboon tahay in koox ahaan looga wada shaqeeyo (wax sawir ah/  ku sawiro ikoni ama wax caan ah oo ku habboon shaqada?)

**Qalabka:**

Khaanad kasta, taas oo uu haguhu ku ururiyey 10–30 qalab nolol maalmeedka loo adeegsado, kuwaas oo ku astaameysan qiimeynta/hadafyada/rajooyinka/waxyaalaha la hantey ama dhacdooyin (qalabtusaaleyn: lacag, qalab gaadiid, khariidad, saacad, cunto, xayawaan, buug). waxa kale oo aan sidoo kale ku badalan karnaa khaadhadh sawiro leh.

**Hadafka:**

Ujeedadda shaqadu waa in ay kiciso in ay ka qeybgalayaashu ka warbixiyaan, maxay yihiin arrimaha ay qiimeynayaan wooyana. Qiimaha iyo dareenkaa hagaya, laakiin sidoo kale amrarka qaarkood wey xadeynayaan dooroshooyinka. Shaqadani waxay leedahay fursad lagaga fikiro doorashooyinka la xidhiidha qiimaha, hadafkaiyo rajooyinka sidoo kalena lagaga baaraandego, sidee ayaad qiimahaaga u dhistey.

**Hagitaanka:**

Hagaha ayaa ku baahinaya meel siman khaanada waxa ku jira ka qeybqaatayaashuna waxay eegi karaan ilaa iyo 5 daqiiqadood. Marka xigtana qof walba wuxuu dooranayaa saddex shay, kuwaas oo isaga uga wakiil ah waxyaalo muhiim u ah. Intaas ka dibna waxaan ka wada sheekeysaneynaa, maxaa la doortey iyo sababtee loo doortey. Qiime noocee ah, hadaf iyo rajo noocee ah ayey doorashadaadu la xidhiidhaa?

**Iskutalaabta bonuska:**

Shaqada waxaan ka sii wadi karnaa shaqooyinkan soo socda:

- Saddexda arrimood ee naftaada ku muhiimka ah ayaa laga dooranayaa mid, ka aad rabtid inaad haysato. Labada kalena waxaa lagu celinayaa khaanadii doorashooyinku ku jireen.
- Dhammaan alaabta oo dhan waxaa lagu celinayaa khaanada, kuwa aanad noloshaada la dooneynin. Intaas ka dibna waxaan ka sheekeysaneynaa, waxa aad dooratey iyo sababtaad u dooratey. Waa maxay qiimaha/hadafka/rajada doorashadaada la xidhiidha?

# Xirfadda mustaqbalka- aniga



**Waxay qaadaneysaa:** 30–45 daqiiqadood. Ku haboon tahay in koox ahaan looga wada shaqeeyo (wax sawir ah/  ku sawiro ikoni ama wax caan ah oo ku habboon shaqada?)

**Qalabka:**

- Xaanshiyo ama kartoono cabirkoodu yahay - A4
- Joornaalada- iyo wargeysyada, kuwo aad ka goosan karto sawiro
- Maqasyo, xabag/ koolo, qalimaan intaa waxaa kale oo dheer haddii loo baahdo qalabka farshaxanka

**Hadafka:**

Shaqadan ujeedadeeddu waa in ay kiciso fikirka ka qeybgalayaasha ee, sidee shaqada iyo caadooyinka shaqo sameyntu u badelmi karaan mustaqbalka sidoo kale xirfaddo noocee ayaa mustaqbalka jiri kara. Nidaamyada farshaxanka ka alkuma iyadoo la adeegsanayo ayuu ka qeybqaatuhu fikirkiisa hadda ku wajahin karaa mustaqbalka iyo maleynta fikiro kale oo kala duduwan.

**Hagitaanka:**

Haguhu wuxuu akhriyayaa oo uu ku dhawaaqayaa doodaha la xidhiidha mustaqbalka shaqada. Doodahaas sidoo kale waa la soo daabici karaa loona qeybin karaa ka qeyb qaatayaasha. Intaas ka dibna waxaan yeelaneynaa wada sheekeysi gaaban oo ah soo bandhigidda sawiradda doodaha mustaqbalka shaqada: Sawirkani ma yahay mid la aaminsan yahay? Ma noqon karaa suurtogal? Ma noqon karaa mid la doonayo ama la rajeynayo?

Intaas ka dib ka qeyb galayaashu waxay xaanshi ka sameynayaan male, kaas oo ah mid shaqada ku jiri doona 20 sanadood ka dib. Xirfadda mustaqbalka- anigu waxay ka aasaasmi kartaa ka qeybqaataha laftiisa, hadafkiisa, laakiin waxay sidoo kale noqon kartaa gebi ahaanba khayaali. Abuuritaanka malaha waxaad kaga faa’iideysan kartaa mustaqbalka shaqada doodaha la xidhiidha waxaand si waadax ah u adeegsan kartaa sawiraad, farshaxamino, qoraal, sawiro joornaalo laga soo jarey iwm.

Malaha waxaa loo dhisayaa iyadoo laga fikirayo su’aalahan soo socda:

- Muxuu ka shaqeeyaa?
- u qabtaaSidee ayuu shaqadiisa?
- Muxuu xirfad ama aqoon isagu leeyahay?
- Qiimo shaqo oo noocee ah ama shaqadiisa qaab noocee ah ayaa ku jira?
- Muxuu ku hamiyaa?

Shaqada marka la furfurayo kaqeybqaatayaashu waxay u soo bandhigayaan kuwa kale malaha kana jawaabayaan su’aalahaas aan kor ku soo sheegney.

**Isku talaabta bonuska:** Malaha waxaa kale oo la weydiin karaa:

- Xaguu ku nool yahay?
- Qoys miyuu leeyahay?
- Xayawaan rabaayad ah miyuu haystaa?

## *Doodaha la xidhiidha mustaqbalka shaqada*

Doodahan waxaa loo isticmaalayaa ”Xirfadda mustaqbalka- Aniga”. Su’aalo waa la isticmaali karaa iyadoo loo adeegsanayo shaqooyinka kale ama shaqada bonuska. Dood kastaba marka la joogo waa laga wada sheekeysan karaa sidoo kale markiiba taako, si ay doodu u hirgasho.Si dabacsan u fikiridda dooduhu waxay u hirgeli karaan xilliyo kala duduwan sanado ahaan 2020–2050 (halkan ma jiraan su’aalo sax ah ama kuwo khalad ahi). Doodaha waa in laisugu soo ururiyaa mustaqbalka shaqada baadhitaanada la xidhiidha iyo sidoo kale sawirada mustaqbalka.

1. Mustaqbalka bulshadu waxay dhimeysaakaalmooyin kaladuduwan, sida kaalmadda shaqo la’aanta.

2. Mustaqbalka shaqooyin badan waxaa laga xalin doonaa shaahsadda xataa adigoo gurigaga jooga (tusaale ahaan qalab in lagugu hago ama  geedi socodka shaqada kombiyuutarkaaga).

3. Aqoonta iyo khibrada ayaa shaqo bixiyaha iyo macaamiishaba uaga muhiimsanaan doonta shahaadada uu qofku soo qaatey.

4. Finland waxaa soo gaadhey iney caan ku noqtey dalxiisayaasha taasoo ay keentey isbedelka cimiladdu, sababtoo ah meelaha kale xagaagii aad ayey u kulul.

5. Mustaqbalka baabuurta yaryar ee shaqsiyaadku aad ayey u yaraan doonaan gaadiidka dadweynaha u adeega ayaana noqon doona gaadiidka ay daku caam ahaan raacaan.

6. Mustaqbalka waxaa laga yaabaa in ay dadku yeeshaan shaqooyin badan oo kala duduwan. Nolol tabcashadu waxay noqon doontaa mid ka kala timaaado meelo badan oo ka kala duduwan sida mishaharka shaqada, meheradaha iyo howlaha haya’adaha/ururasa.

7. Shaqada mustaqbalka waxaa la dalban doonaa shaqaale ku hadla afaf kale oo ka badan kuwa imika lagu hadlo.

8. Mustaqbalka daabacaada - 3D- iyo –ka sawiridda, qaabeynta laserka ja waxyaalaha cilmiyeysan waxay noqon doonaan kuwo maalin walba la isticmaalo.

9. Mustaqbalka firtuwalka ayaa muuqaal ahaan goobta shaqadatagitaankeeda dabooli karta aduunka oo dhan waxaana laga yaabaa kilomitirada la safraa in ay noqdaan usbuuciiba ilaa 3000.

10. Mustaqbalka qeyb dhakhaatiirta iyo kalkaalisooyinka ka mid ahi waxay noqonayaan robotiyaal.